



# Xuquuqdayda iyo mas'uuliyaddeyda



Waxay WIC bixiyaan adeegyada ay ka mid yihiin barashada nafaqada, taageerada naas-nuujinta, tixraacyada iyo cuntada dheeraadka ah ee caafimaadka ku siin kara. Shaqaalaha WIC waxay wax kaa weydiin doonaan caadooyinkaada ku saabsan caafimaadka iyo cuntada si ay WIC u noqoto wax aad ka faa'ideysato.

## Xuquuqdayda

### Marka aan isku qoro WIC, waxaan xaq u leeyahay:

- Wada shaqeyn la yeesho shaqaalaha WIC ee dhegeysta baahida aan qabo.
- Boonooyinka lagu iibsado cuntada nafaqada leh ee dheeraadka ku ah cuntadayda. Cuntada WIC waxay leedahay nafaqo muhiim ah ee caafimaadkayga u wanaagsan.
- Barashada nafaqada ee ku saabsan mawduucyada aan xiiseeyo.
- Tixraacyada ku saabsan adeegyada kale.
- Daakhilin La'aanta. Macluumaadkayga waxaa ay ahaanayaan kuwo qarsoodi ah.
- Adeegga ficnan, iyo dhaqanka siman ee caddaaladda leh ee bukaan socod eegtada iyo dukaanka WIC.

Sida waafaqasan sharciga qaranka iyo qaanuunka Wasaaradda Beeraha, WIC waxaaa mamnuuc ka ah in ay dadka ku kala soocdo jinsiyadda, midabka, asalka qaranimo, nooca qofka, da'da, ama naafada. Si aad ashtako uga soo gudbisno arrimaha ku saabsan kala soocidda, waxaad la xiriirtaa:

Macluumaadka bukaan socod eegtadaada:

**AMA**

USDA, Director  
Office of Civil Rights  
1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410  
800-795-3272 (codka)  
202-720-6382 (TTY)

- In aan dacwad dhageysi codsado haddii aan kula raacsanayn go'aanka bukaan socod eegtadayda WIC iyadoo aan la xiriiraayo:

Department of Human Services  
Oregon WIC Program  
P.O. Box 14450  
Portland, OR 97293-0450

Taleefoonka: 971-673-0040  
TTY: 1-800-735-2900  
Faakis: 971-673-0071

**Gedi**



Haddii aad doonaysid macluumaadkan oo nooc kale ah, waxaad fadlan wacdaa 971-673-0040. WIC waa barnaamij iyo shaqaaleye caddaalad ku dhisan.

[www.oregon.gov/dhs/ph/wic](http://www.oregon.gov/dhs/ph/wic)

My rights and responsibilities



57-630-SOMA (10/2008)

## Mas'uuliyaddeyda

### Haddii aan ahay ka qayb-qaafe barnaamijka WIC, waxaan:

- ☑ In aan keeno caddaynta aqoonsiga, cinwaanka aan ku noolahay, iyo dakhliga dhammaan dadka guriga ku nool markasta oo la eegaayo in aan WIC ka qayb-qaadan karo. (Ma aha in aan haysto jinsiyad Mareykan ah si aan u helo adeegyada WIC.)
- ☑ In aan u soo qaato kaarka Aqoonsiga WIC dhammaan ballanadayda WIC.
- ☑ In aan tago ballanada aan ku leeyahay bukaan socod eegtada WIC ama aan waco haddii aan tagi karin. Haddii aan tagi karin ballanada si aan u soo qaato boonooyinka, waxaa laga yaabaa in ay dib u dhacaana amaba la joojiyo adeegyada WIC.
- ☑ Tagayaa barashada tacliinta nafaqada ee aniga iyo qoyskayga inaga caawinaayo barashada nafaqada fiican.
- ☑ Si aad dib u dalbato gargaarka WIC dhammaadka muddo kasta oo la xaqiijinayo.
- ☑ La socodsiiya bukaan socod eegtadayda WIC haddii aan u guuro meel kale si macluumaadkayga loo wareejiyo.
- ☑ Waxaad ku iibsataa boonooyinka WIC cuntada saxda ah iyo tirada saxda ah dukaamanka ay oggol yihiin barnaamijka WIC ee Oregon.
- ☑ Waxaad cuntada iyo alaabta WIC ugu talagashaa shakhsiga boonada ku yaal.
- ☑ Waxaan kaarkayga Aqoonsiga WIC tusinayaa xisaabiyaha markasta ee aan cunto iibsanaayo.
- ☑ Waxaan saxiixayaa boonada wajigeeda hore sanduuqa loo sameeyey kaddib marka la geliyo tirada saxda ah.
- ☑ In aan waco bukaan socod eegtada WIC haddii aan su'aalo qabo, haddii aanan arag cuntada ama alaabta WIC ee aan dukaamanka uga baahnahay ama haddii aan qaato in ka badan inta aan u baahnahay.

## Qaanuunada barnaamijka WIC

### Waxaan raaci doonaa qaanuunada soo socda haddii kale waxaa la iga saarayaa barnaamijka WIC:

- ▶ Waxaad runta ka sheegtaa macluumaadka aad siiso WIC oo idil.
- ▶ Waxba ha ka beddelin boonooyinka iyo kaarkaaga aqoonsiga WIC.
- ▶ Ha codsan cunto ama alaab aan ku jirin boonooyinka. Lama oggola in shey lagu beddesho ama jeegagga ballanqaadka.
- ▶ Marna ha iibin, ha ka ganacsan ama bixin cuntada, alaabta ama boonooyinka WIC.
- ▶ Cuntada ama alaabta WIC ma aad ku beddelan kartid lacag caddaan ah, amaah ama waxyaabo kale.
- ▶ Ha isticmaalin boonada aad bukaan socod eegtada u sheegtay in ay kaa luntay ama xaday.
- ▶ Ma aad isku qori kartid in ka badan hal barnaamij oo WIC ah markiiba.
- ▶ Mar kaliya iskuma aad qori kartid Barnaamijka Cuntada ee Badeecadda Dheeraadka ah (Barnaamijka Waayeelka iyo Caafimaadka Carruurta - Healthy Kids and Seniors Program) iyo Barnaamijka WIC.
- ▶ Marna in aan la aflagaadeyn, dhibaateyn, hanjabin ama dhaawac jidhka loo geysan WIC ama qof ka tirsan shaqaalaha dukaanka.